

# FoodShare



## WISCONSIN

A Recipe for Good Health



## Sharciyada Shaqada ee Aasaasiga ah ee FoodShare ee Codsadeyaasha iyo Xubnaha Da'doodu tahay 16 Ilaa 59 (FoodShare Basic Work Rules for FoodShare Applicants and Members Ages 16 Through 59)

### Waa maxay sharciyada aasaasiga ah ee FoodShare?

Sharciyada federaalku waxay u baahan yihiin in codsadeyaasha iyo xubnaha FoodShare ee da'doodu u dhaxayso 16 ilaa 59 ay raacaan sharciyada shaqada ee aasaasiga ah ee FoodShare. Markaad buuxiso codsiga FoodShare ama aad cusbooneysiisato, waxa lagaa rabaa in aad raacdo sharciyada shaqada FoodShare oo waa in aad u diiwaangashan tahay shaqa-helid.

Sharciyada shaqada ee aasaasiga ah ee FoodShare way ka duwan yihiin shuruudaha shaqada ee FoodShare ee dadka waaweyn qaarkood ee da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 64 kuwaas oo aanay carruur da'doodu tahay 13 ama ka yar kula noolayn guriga.

Haddii aadan raacin sharciyada shaqada aasaasiga ah ee FoodShare, oo aan lagaa dhaafin, ma lagu siin karo manaafacaadka FoodShare ilaa iyo in muddo ah. Tan waxaa la yiraahdaa muddada ganaaxa.

Haddii aad raacayso sharciyada shaqada ee aasaasiga ah, waa inaad:

- In aad xafiiska shaqada u keento xaalkaaga shaqada ama haddii aad shaqeyn karto.

- In aadan si ulakac ah uga tegin shaqo ah 30 saac ama ka badan toddobaadkii adigoon haysan sabab macquul ah (ama shaqo dakhligeeda toddobaadkii yahay \$217.50 ama ka badan).
- In aadan saacadahaaga shaqada ka yareyn 30 saac toddobaadkii adigoon haysan sabab macquul ah (haddii aadan qaadaneyn mushaar toddobaadkii ah \$217.50 ama ka badan).
- In aad aqbasho shaqada lagu siiyo haddii ay kugu habboon tahay.
- In aad ka soo baxdo shuruudaha lagu helo lacagta shaqa-la'aanta haddii aad codsatay ama aad qaadato lacagta shaqa-la'aanta.
- In aad ka soo baxdo shuruudaha ka-qaybgalka Wisconsin Works (W-2) haddii aad ka qaybqaadanayso W-2.

### Waa maxay ka-dhaafitaannada sharciyada shaqada ee aasaasiga ah ee FoodShare?

Waa in aad u qalanto in lagaa daayo shuruudaha shaqada FoodShare ee soo socda **haddii** ay jiraan waxyaabaha soo socda:

- Waa in aad jirto 16 ama 17 sano oo aadan ahayn qofka koowaad ee codsiga FoodShare.
- Waa in aad jirto 16 ama 17 sano oo aad tahay qofka koowaad ee codsiga FoodShare oo aad



dhigato dugsi ama aad ku jirto barnaamij tababar shaqo ugu yaraan waqti barkiis (half-time) ah.

- Waa in la soo ogaado in aadan shaqeyn karin. Arrintan waxay khuseysaa:
  - Markaad si meelgaar ama joogto ah dowlad ama meel kale uga qaadato lacagta naafada.
  - Marka xafiisku ogaaday inaad shaqeyn karin dhibaato ah jirka ama maskaxda awgeed.
  - Marka la soo xaqiijiyey inaad awoodin inaad shaqeyso oo ay soo sheegaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ama adeegyada bulshada.
- Markaad ku qoran tahay W-2 oo aad u sameyso shuruudaha shaqada ee W-2.
- Markaad tahay daryeelaha koowaad ee ilma ay da'diisu ka yar tahay 6 jir (haddii ilmuhu guriga kugula nool yahay ama haddii uusan kula nooleyn). Hase yeeshee, Haddii adiga ama qof kale labadiinaba aad ilmaha u tihiin waalid ilaaliya, kaliya labadiina midkiin ayaa laga dhaafayaa shuruudaha iska diiwaangelinta shaqada maadaama uu yahay daryeelaha koowaad ee ilmaha.
- Haddii aad tahay daryeelaha koowaad ee qof kale oo aan awoodin inuu is daryeelo ama isdaryeesho (haddii qofku ku nool yahay gurigaaga ama uu ku nool yahay banaanka guriga).
- Markaad codsatay ama qaadato lacagta shaqa-la'aanta.
- Markaad si joogto ah uga qaybqaadato barnaamijka daaweynta ama dhaqan-celinta ku-takri-falka aalkolada ama daroogada kale (AODA).
- Markaad shaqeyneyso 30 saac ama ka badan toddobaadkii ama aad qaadato mushaar ah \$217.50 ama ka badan toddobaadkii.
- Markaad ugu yaraan waqti barkiis (half-time) ku qoran tahay dugsi la aqoonsan yahay, barnaamij tababar, ama machad waxbarasho sare.

Waxaa lagaa rabaa inaad xafiiska u keento caddeyn haddii aad buuxiso mid ka mid ah ka-dhaafitaannadan.

## **Maxaa dhacaya haddii aanan raacin sharciyada shaqada ee aasaasiga ah oo aanan u qalmin wax ka-dhaafitaan ah?**

Haddii aad raaci weydo shuruudaha shaqada iyadoo aan lagaa dhaafin, manaafacaadka FoodShare ma heli kartid ilaa lagu ganaaxo wakhti cayiman. Waa markaad adigu sabab la'aan iskaa u sameyn weydo waxyaabaha soo socda:

- Inaad diidday shaqo kugu habboon.
- Inaad ka tagtay shaqo aad shaqeyneysay 30 saac ama kasii badan toddobaadkii (ama shaqo kasta oo ah 30 saac toddobaadkii marka loo eego lacagta ugu yar ee federaalka).
- Inaad iska yareysay saacadaha oo aad ka dhigatay wax ka yar 30 saac toddobaadkii (ama lacagtaadu ka yar yahay 30 jeer lacagta ugu yar ee federaalka).
- Inaad ka qeybgashay W-2 oo aadan soo buuxin shuruudaha shaqada ee barnaamijka W-2.
- Inaad codsatay lacagta shaqa-la'aanta laakiin aadan buuxin shuruudaha shaqada ee barnaamijka lacagta shaqa-la'aanta.

## **Maxaa dhacaya haddii aanan sii haysan karin ka-dhaafitaanka?**

Haddii aadan sii haysaneyn ka-dhaafitaanka, waa in aad raacdo shuruudaha shaqada aasaasiga ah ee FoodShare. Haddii aadan haysan mid ka mid ah waxyaabaha soo socda sabab macquul ah la'aan, ma heli doontid manaafacaadka FoodShare muddo xaddidan, ilaa aad mar kale hesho ka-dhaafitaan kale:

- Marka aad ku qoran tahay W-2 oo aad u sameyso shuruudaha shaqada ee W-2.
- Markaad codsatay ama qaadato lacagta shaqa-la'aanta.
- Markaad shaqeyneyso 30 saac ama ka badan toddobaadkii ama shaqo kasta oo ah 30 saac toddobaadkii marka loo eego lacagta ugu yar ee federaalka.

## **Intee bay le'eg tahay muddada ganaaxa?**

Muddada ganaaxa waxay ku xiran tahay haddii mar hore lagu soo ganaaxay.

- Muddada ganaaxa koowaad waa hal bil.
- Muddada ganaaxa labaad waa saddex bilood.

- Muddada ganaaxa saddexaad ama kan xiga waa ilaa lix bilood.

## Goor hore ma joojin karaa muddada ganaaxa?

Waxaad joojin kartaa ganaaxa goor hore haddii lagaa daayo shuruudaha ah in aad isku qorto shaqada.

## Marka aan ka baxo ganaaxa, sidee baan mar labaad FoodShare ku helayaa?

Waa in aad mar kale soo buuxiso codsiga. Haddii aad ka mid tahay kooxda FoodShare, waa inaad shaqaalahaaga u oggolaatid inuu cusbooneysiyo kiiskaaga halkii aad adigu dib ugu codsan lahayd.

## Waa maxay macnaha sabab macquul ah (good cause)?

Sabab macquul ah waxay ka dhigan tahay in ay jirto xaalad ka baxsan xakameyntaada oo kaa hor istaageysa inaad buuxiso shuruudaha is-diiwaangelinta shaqada. Haddii aadan haysan sabab macquul ah, ma awoodi doontid inaad hesho manaafacaadka FoodShare muddada ganaaxa lagu jiro. Haddii aad haysato sabab macquul ah, weli waxaad sii qaadan kartaa FoodShare. Shaqaaluhu waxay tixgelinayaan xaaladdaada si loo go'aamiyo haddii ay jirto sabab macquul ah.

Qaar ka mid ah tusaaleyaasha sababaha macquul ah waa:

- In aad diidday shaqo, ama aad shaqo ka tagtay, shaqada oo kugu xumeyd awgeed.
- In lagaa eryey ama aad ka tagtay markay shaqadu kaa codsatay.
- In goob shaqo lagugu takooray sabab ah da', isir, jinsi, midab, curyaanimo, diin aad aaminsan tahay, asalka dalkii hore, ama siyaasad aad aaminsan tahay.
- In aad shaqadaadii uga tagtay shaqo kale, tababar, ama iskuul.
- In aadan sii wadan karin shaqadaadii adiga oo guuray awgeed.
- Dhibaatooyin caafimaad oo adiga ku haysta, ama dhibaatooyin caafimaad oo dad kale haysta, oo aan kuu oggolaan inaad sii wadato shaqadaada.
- In ay goobta shaqada kaa yareysay saacadahaaga shaqada adigoo aan raalli ka ahayn.

- In aad shaqo ka tagtay si aad ugu biirto barnaamij is-xilqaamid ah sida AmeriCorps ama AmeriCorps VISTA.
- In aadan haysan gaadiid aad shaqada u qaadato.
- In aadan xannaano u haysan ilma ka yar 12 jir.
- In ay jireen xaalado kale oo ka baxsan xakameyntaada oo uu xafiisku u arko sabab macquul ah.

## Sidee baan faahfaahin ku helayaa?

Wax badan ka baro sharciyada shaqada aasaasiga ah ee FoodShare halkan:

[dhs.wisconsin.gov/foodshare/basic-work-rules.htm](https://dhs.wisconsin.gov/foodshare/basic-work-rules.htm)

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha diiwaangelinta shaqada, la xiriir hay'adaada ama tixraac Buug-yaraha Diiwaangelinta iyo Manaafacaadka,

[dhs.wisconsin.gov/publications/p0/p00079.pdf](https://dhs.wisconsin.gov/publications/p0/p00079.pdf). Si

aad u hesho hay'adaada, booqo

[dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency/index.htm](https://dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency/index.htm),

ama ka soo wac Adeegyada Xubnaha lambarka 1-800-362-3002 (TTY iyo adeegyada turjumaada waa la heli karaa).

**Ogow:** Sharciyada shaqada ee aasaasiga ah ee FoodShare way ka duwan yihiin shuruudaha shaqada FoodShare ee dadka waaweyn ee lixaadkoodu dhan yahay (able-bodied) ee da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 64. Ka eego FoodShare Wisconsin: Xaashida macluumaadka Shuruudaha Shaqada ee Dadka Waaweyn ee Da'doodu u Dhaxayso 18 Ilaa 64 (The Work Requirement for Adults Ages 18 Through 64, P-00710) wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan shuruuddan. Xaashida macluumaadka waxaa laga heli karaa:

[dhs.wisconsin.gov/publications/p0/p00710.pdf](https://dhs.wisconsin.gov/publications/p0/p00710.pdf).

## Ballanqaadka Takoorid-la'aanta

Sida waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo xeerarka iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ah ee U.S. Department of Agriculture (USDA, Waaxda Beeraha ee Mareykanka), hay'addan waxaa laga mamnuucay inay qof takoorito iyadoo lagu saleynayo jinsiyadda, midabka, asalka qaranka, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo dookha galmada), caqiidada diinta, naafanimada, da'da, fikirka siyaasadeed, ama aargoosiga ama aar-gudashada ka dhanka ah hawl waafaqsan xuquuqda madaniga ahaa ee hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa laga yaabaa in lagu heli karo luuqado aan Ingiriisi ahayn. Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan, farta indhoolka, daabacaad weyn, cajalad maqal ah, Luqadda Calaamadaha Mareykanka), waa inay la xiriiraan hay'adda (gobolka ama deegaanka) halkaas oo ay ka codsan karaan dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, dadka maqalka adag ama kuwa qaba naafada hadalka waxay la xiriiri karaan USDA iyadoo ka wacaaya Federal Relay Service (Adeegga Gudbinta ee Federaalka) (800) 877-8339.

Si aad u gudbiso cabasho ku saabsan takooridda barnaamijka, qofka cabanaya waa inuu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takooridda Barnaamijka USDA kaas oo laga heli karo khadka tooska ah:

<https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf>, xafiis kasta oo USDA ah, adigoo wacaya (833) 620-1071, ama qoraya warqad loo dirayo USDA. Warqadda waa inuu ku qoran yahay magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka qofka dacwoonaya, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takooridda ah ee la sheegay si faahfaahsan oo ku filan si loogu wargeliyo Assistant Secretary for Civil Rights (ASCR, Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga ah) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la sheegay. Foomka la buuxiyay ee AD-3027 ama warqadda waa in loo gudbiyaa:

(1) **Boostada:**

Food and Nutrition Service, USDA  
1320 Braddock Place, Room 334  
Alexandria, VA 22314; ama

(2) **fakiska:**

(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama

(3) **boostada intarnetka:**

[FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov](mailto:FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov)

Fursadaha xafiiskan waa kuwa ay dadku u siman yihiin.

02/15/2023